# Ilmahaagu wuxuu u baahan yahay tallaalo inta uu korayo!

## Tallaalada Lagu Taliyay ee Loogu Talagalay Dhalashada Ilaa 6 Sanno Jirka ee 2024

**Ma rabtaa inaad wax badan ogaato?**
Iskaan garee koodhka QR si aad u ogaato tallaalada ilmahaagu u baahan karo. Ama booqo [www.cdc.gov/vaccines/tool/child.html](www.cdc.gov/vaccines/tool/child.html)

| TALLAALKA AMA JEERMISKA JIR-GALAHA KAHORTAGGA AH | DHALASHADA | 1 BIL | 2 BILOOD | 4 BILOOD | 6 BILOOD | 7 BILOOD | 8 BILOOD | 12 BILOOD | 15 BILOOD | 18 BILOOD | 19 BILOOD | 20–23 BILOOD | 2–3 SANNO | 4–6 SANNO |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| Jeermiska jir-galaha ah ee Cudurrada Neefta iyo Sambabada (RSV) | Waxay ku xiran tahay heerka tallaalka Fayraska Cudurrada Neefta iyo Sambabada (RSV) ee hooyada | | | | | | Waxay ku xiran tahay xaaladda caafimaad ee ilmaha | | | | | | | |
| Cagaarshowga B | Garoojada 1 | Garoojada 2 | | | Garoojada 3 | | | | | | | | | |
| Fayraska shuban-biyoodka | | | Garoojada 1 | Garoojada 2 | Garoojada 3 | | | | | | | | | |
| Gawracatada, Teetanada, iyo Xiiqdheerta | | | Garoojada 1 | Garoojada 2 | Garoojada 3 | | | | Garoojada 4 | | | | | Garoojada 5 |
| Nooca 2 ee ifilada Haemophilus (Hib) | | | Garoojada 1 | Garoojada 2 | Garoojada 3 | | | Garoojada 4 | | | | | | |
| Oof-wareenka/ Burunkiitada | | | Garoojada 1 | Garoojada 2 | Garoojada 3 | | | Garoojada 4 | | | | | | |
| Dabaysha | | | Garoojada 1 | Garoojada 2 | Garoojada 3 | | | | | | | | | Garoojada 4 |
| COVID-19 | | | | | Ugu yaraan 1 garoojo oo tallaalka COVID-19 ah ee la cusbooneysiiyay (kan 2023–2024). | | | | | | | | | |
| Ifilada/Hargabka | | | | | Sannad walba. Laba garoojo carruurta qaarkood | | | | | | | | | |
| Jadeecada, Qaamo-qashiirta, iyo Jadeeco Jarmalka (MMS) | | | | | | | | Garoojada 1 | | | | | | Garoojada 2 |
| Busbuska | | | | | | | | Garoojada 1 | | | | | | Garoojada 2 |
| Cagaarshowga A | | | | | | | | 2 garoojo oo la qaato 6 bilood kasta | | | | | | |

**MUHIIM AH**

- Dhammaan carruurta ay tahay in la tallaalaa marka ay jiraan da'dan.
- Carruurta qaarkood waa inay qaataan garoojadan tallaalka ama jeermiska jir-galaha kahortagga ah marka ay da'dan gaaraan

**Kala hadal bixiyaha daryeelka caafimaadka ilmahaaga wixii hagis dheeraad ah hadduu:**

1. Ilmahaagu qabo xaalad caafimaad oo halis sarraysa u gelin karta caabuq.
2. Ilmahaagu u safrayo meel ka baxsan Maraykanka.
3. Ilmahaaga seegay tallaalka lagula taliyay da'aadiisa.

[www.cdc.gov/vaccines](www.cdc.gov/vaccines)

**WIXII MACLUUMAAD DHEERAAD AH**
Wac lambarka bilaashka lagu waco: **1-800-CDC-INFO (1-800-232-4636)**
Ama booqo: **www.cdc.gov/vaccines/parents**

DHALASHADA–6 SANNO JIR

# Cudurradee ayay tallaaladani kaa difaaci karaan?

| CUDUR TALLAALKA LOOGA HORTAGI KARO | DHIBAATOOYINKA CUDURKA |
|---|---|
| **Fayraska Cudurrada Neefta iyo Sambabada (RSV)**<br>Waa cudur fayras oo faafi karo oo ku dhaca sanka, cunaha, iyo mararka qaarkood sambabada; waxaa lagu kala qaadi karaa hawada iyo is-taabashada | Caabuqa sambabada (oof-wareen/burunkiito) iyo marrinada hawada ee sambabada; ee gaar ahaan halista ku ah dhallaanka<br>iyo carruurta yaryar |
| **Cagaarshowga B**<br>Waa cudur fayras oo la kala qaadi karo oo ku dhaca beerka; wuxuu ku faafaa taabashada dheecaannada jirreed ee cudurka leh sida dhiigga ama shahwada | Cudurka beerka ee raaga, hawlgabka beerka, kansarka beerka, dhimasho. |
| **Fayraska shuban-biyoodka**<br>Waa cudur fayras oo faafa oo ku dhaca xiidmaha; waxaa laga qaadaa gacmaha iyo cuntada leh saxarrada ee afka la geliyo. | Shuban daran, fuuqbax, dhimasho |
| **Gawracatada***<br>Waa cudur bakteeriyo oo faafi karo oo ku dhaca sanka, cunaha, iyo mararka qaarkood sambabada; waxaa lagu kala qaadi karaa hawada iyo is-taabashad | Murqaha wadnaha ee barara, wadne-xannuun, miyir-beel/kooma, curyaanimao/faalij, dhimasho |
| **Pertussis** **(Whooping Cough)***<br>Waa cudur bakteeriyo oo faafi karo oo ku dhaca sambabada iyo marin-haweedka; waxaa lagu kala qaadi karaa hawada iyo is-taabashada | Caabuqa sambabada (oof-wareen/burunkiito), dhimasho; gaar ahaan ay halista ugu jiraan dhallaanka |
| **Teetanada** **(Kala-wareega qalka)***<br>Cudurka waxaa keena manka bakteeriyada ee laga helo ciidda iyo boorka ka jira meel kasta; manka ayaa jirka ka gala nabarrada ama boogaha | Suuxdin, jajabka lafaha, neefsasho la'aan, dhimasho |
| **Hib** **(Nooca 2 ee ifilada Haemophilus)**Cudur bakteeriyo oo la kala qaadi karo oo ku dhaca sambabada, maskaxda iyo laf-dhabarta, ama xiddidada dhiigga; waxaa lagu kala qaadaa hawada iyo is-taabashada | Waxay ku xiran tahay qaybta jireed ee cudurka qabta, balse waxaa ku jiri kara dhaawaca maskaxeed, wax maqal la'aanta, go'ida gacanta ama lugta, dhimasho |
| **Oof-wareen/Burunkiitada**<br>Waa cudur bakteeriyo oo ku dhaca ee dhegaha, sanqaroorka, sambabada, ama xiddidada dhiigga; waxaa lagu kala qaadaa taabashada tooska ah ee gobo'da neefsasho sida candhuufta ama xaakada | Waxay ku xiran tahay qaybta jireed ee uu cudurku ku dhaco, balse waxaa ku jiri kara caabuqa sambabada (oof-wareen/burunkiito), sumowga dhiigga, caabuqa ku dhaca xuubabbka maskaxda iyo xangulada, dhimasho |
| **Dabaysha**<br>Waa cudur fayras oo la kala qaado oo ku dhaca neerfaha iyo maskaxda; waxaa laga qaadaa gacmaha wasakhaysan, cuntada ama dareeraha saxarada leh, iyo hawada iyo is-taabashada | Curyaanimo, dhimasho |
| **COVID 19**<br>Waa cudur fayras oo ku dhaca sanka, cunaha, ama sambabada; wuxuu u ekaan karaa hargabka ama ifilada. Waxaa lagu kala qaadi karaa<br>hawada iyo is-taabashada | Caabuqa sambabada (oof-wareen/burunkiito); xinjirowga dhiigga; dhaawaca beerka, wadnaha ama kelyaha; COVID-ka raaga; dhimasho |
| **Ifilo** **(hergab)**<br>Waa cudur fayras oo faafi karo oo ku dhaca sanka, cunaha, iyo mararka qaarkood sambabada; waxaa lagu kala qaadi karaa hawada iyo is-taabashada tooska ah | Caabuqa sambabada (pneumonia), sanbabada iyo caabuqa dhegta, ka sii daraya xaaladaha wadnaha ama sambabada<br>ee cudurka ku lammaan, dhimasho |
| **Jadeecada** **(Jadeeco Jarmalka)†**<br>Waa cudur fayras oo la kala qaado oo sababa xummad, qufac, indho cascas, dililiq, iyo firiiric; wuxuu ku faafaa hawada iyo is-taabashada | Bararka maskaxda, caabuqa sambabada (wareento/burunkiito), dhimasho |
| **Qaamo-qashiirta†**<br>Waa cudur fayras oo la kala qaado oo keena qandho, daal, bararka dhabannada, iyo daanka; wuxuu ku faafaa hawada iyo is-taabashada | Bararka maskaxda,  xanuunka iyo bararka xaniinyaha ama ugxan-sidaha, dhegoolenimo, dhimasho |
| **Jadeecada** **(Jadeeco Jarmalka)†**<br>Waa cudur fayras oo la kala qaadi karo oo sababa qandho heerkeedu hooseeyo, cune-xannuun, firiiric; wuxuu ku faafaa hawada iyo is-taabashada | Waa cudur halis u leh haweenka uurka leh; wuxuu sababi karaa dhicin ama dhimashada uurjiifka, dhicis, cilladaha lagu dhasho ee daran |
| **Busbuska** **(Busbus)**<br>Waa cudur fayras oo la kala qaado oo keena qandho, madax-xannuun, iyo cuncun, finan boogo boqda; waxaa laga qaadaa hawada iyo is-taabashada | Nabarrada caabuqa leh, bararka maskaxda, caabuqa sambabada (wareento/burunkiito), dhimasho |
| **Cagaarshowga A**<br>Cudur fayras oo la kala qaadi karo oo ku dhaca beerka; waxaa laga qaadaa cuntada ama cabbitaanka wasakhaysan ama taabashada qof cudurka qaba | Hawlgabka beerka, dhimasho |

***Tallaalka DTaP** wuxuu kahortagaa cudurrada teetanada, gawracatada, iyo xiiqdheerta

**†Talaalka MMR** wuxuu kahortagaa jadeecada, qaamo-qashiirta, iyo jadeecada

Ugu dambeyn la cusbooneysiiyay Abriil 2024